



Qeexidda Weeraha Caymiska Caafimaadka Ee Ugu Sarreeya

Hagaha Isticmaalayaasha ku Haga Weeraha Muhiimka ah



HAGAHA ISTICMAALAYAASHA KU HAGA WEERAHA MUHIIMKA AH

Laga jari karo

WAA MAXAY LAGA JARI KARO?

Qadarkaaga laga jari karo (deductible) waa qaddarka ay tahay in aad ku bixiso daryeelka ka hor inta qorshahaaga caafimaadka uusan bilaabin in uu kharashka kula wadaago. Qaddarkaaga laga jari karo ayaa wuxuu bilaabanayaa bilowga sannad kasta.

SIDA UU U SHAQEEYO

Marcus wuxuu haystaa qaddar laga jari karo oo dhan \$2,000. Wuxuu ku jiray cusbitaal kharashaadkiisa dhan \$10,000. Marcus waa in uu bixiyaa qaddarka laga jari karo kahor inta qorshahiisa caafimaadka uusan bixin wax ka mid ah kharashaadkiisa. (Qaddarka laga jari karo iyo kharashaadka kale waa kuwo ku kala duwan qorshaha caafimaadka.)



HAGAHA ISTICMAALAYAASHA KU HAGA WEERAHA MUHIIMKA AH

**Liiska
Daawooyinka
ee Qorshaha
Caymiska**

WAA MAXAY LIISKA DAAWOYINKA EE QORSHAHA CAYMISKA?

Liiska daawooyinka ee qorshaha waa liiska daawooyinka ee uu caymiyay qorshahaaga caafimaadka. Qorshahaaga caafimaadka ayaa bixin doonna dhammaan ama qayb ka mid ah kharashaadka daawooyinkan.

SIDA UU U SHAQEEYO

George ayaa wuxuu tagayaa farmashiyaha si uu u soo qaato daawooyin cusub oo loo soo qorey. George ayaa farmashiilaha tusinaya liiska daawooyinka qorshaha si uu u eego. Qorshahiisa caafimaadka ayaa bixin doona kharashka daawada. George ayaa keliya bixinaya \$20 oo ah lacag-bixintiisa caymiska ee la wadaago. Qorshahiisa ayaa inta dhiman bixinaya. *(Qaddarka lacag-bixinta caymiska ee la wadaago ayaa ku kala duwan qorshaha caafimaadka)*



\$20

rijeeto ama daawo kasta
oo loo soo qoro

HAGAHA ISTICMAALAYAASHA KU HAGA WEERAHA MUHIIMKA AH

**Bixiyaha
Daryeelka
Aasaasiga ah**

WAA MAXAY BIXIYAHA ADEEGGA DARYEELKA AASAASIGA AH?

Bixiyaha adeegga daryeelka aasaasiga ah waa dhakhtarka ama kalkaaliyaha caafimaad ugu weyn ee aad booqato sida qayb ka mid ah qorshahaaga caafimaadka. Bixiyahaaga adeegga daryeelka aasaasiga ah ayaa maareeya daryeelkaaga caafimaadka. Waxay la shaqeyn karaan takhasuslayaal si ay u ilaaliyaan caafimaadkaaga.

SIDA UU U SHAQEEYO

Waa hore, ayuu Roger wuxuu tagey Qolka Xaaladaha Degdegga ah mar uu xanuunsanaa. Iminka, wuxuu leeyahay qorshe caafimaad oo u oggolaanaya in uu doorto bixiyaha adeegga daryeelka aasaasiga ah. Wuxuu booqdaa bixiyahiisa adeegga daryeelka aasaasiga ah marka uu xanuunsan yahay, waxayna ka daaweeyaan calaamadaha xanuunka ee uu qabo. Haddii Roger uu u baahan yahay daryeel takhasusi ah, bixiyahiisa adeegga daryeelka aasaasiga ah ayaa wuxuu ku xiriirin doonnaa takhasusle.



Booqo bixiyaha daryeelkaaga aasaasiga ah si aad uga hesho baaritaano, daryeelka aan degdegga ahayn iyo daryeelka lagu bixiyo barta internet-ka.

HAGAHA ISTICMAALAYAASHA KU HAGA WEERAHA MUHIIMKA AH

**Canshuur
Dhaafka Lacagta
Joogtada ah ee
Caymiska**

WAA MAXAY CANSHUUR DHAAFKA LACAGTA JOOGTADA AH EE CAYMISKA?

Canshuur dhaafka waxay yareysaa qaddarka aad ku bixiso qorshahaaga caafimaadka bil kasta. Qaddarka canshuur dhaafka ee aad helayso waxay ku xiran tahay dakhligaaga.

Booqo wahealthplanfinder.org ama wac **1-855-923-4633** si aad u hesho macluumaad dheeraad ah

SIDA UU U SHAQEEYO

Marcela waa gabar qaangaar ah, keligeeda ah oo aan lahayn qorshe caafimaad. Dakhligeeda sannadlaha ah waa \$25,000. Waxay heshaa canshuur dhaaf sabab u ah heerka dakhligeeda. Marcela waxay isticmaali kartaa canshuur dhaafkan si ay u yareyso lacag-bixinadeeda bilaha ah. *(Tirooyinka dhabta ah way kala duwan yihiin.)*



Qiimaha Lacagta
Joogtada ah ee
Caymiska



Canshuur dhaafka
lacagta joogtada ah
ee caymiska

=



Lacag-bixinnaa
bilaha ah ee
hooseeya

HAGAHA ISTICMAALAYAASHA KU HAGA WEERAHA MUHIMKA AH

Caymiska- La-Wadaago

WAA MAXAY CAYMISKA-LA-WADAAGO?

Caymiska-la-wadaago waa saamigaaga ee kharashka adeegga daryeelka caafimaadka ee la caymiyay. Waxaad bilaabi doontaa in aad bixiso lacagaha caymiska la wadaago ka-dib marka aad bixiso lacagaha caymiska laga jari karo ee qorshahaaga caafimaadka. Caymiska-la-wadaago waa mid ka mid ah siyaabaha aad kula wadaagto kharashka daryeelkaaga caafimaad qorshahaaga caafimaadka.

SIDA UU U SHAQEEYO

James wuxuu bixiyay qaddarka laga jari karo. Waxaa booqashada dhakharka awgeed lagu soo dalacay \$500. James wuxuu bixinayaa 20% ee qaansheegadka, ama \$100. Qorshahiisa caafimaadka ayaa inta kale bixin doonna. (Qaddarka caymiska la wadaago wuxuu ku kala duwan yahay qorshaha caafimaadka.)



%20 caymiska-la-wadaago

X

\$500 wadarta guud ee qaansheegadka

\$100 ayaa James laga rabaa

HAGAHA ISTICMAALAYAASHA KU HAGA WEERAHA MUHIIMKA AH

**Lacagaha
caymiska ee
joogtada ah**

WAA MAXAY LACAGTA CAYMISKA EE JOOGTADA AH?

Lacagahaaga caymiska ee joogtada ah waa lacagta aad bil kasta ku bixiso qorshahaaga caafimaadka. Waa in aad bixisaa lacagahaaga caymiska ee joogtada ah xitaa haddii aadan qaadan wax adeegyada daryeel caafimaad ah. Kala xiriir shirkadaada caymiska su'aalo kasta oo ku saabsan lacag-bixinta.

SIDA UU U SHAQEEYO

Jean waxay bil kasta u bixisaa lacagta joogtada ah ee qorshaheeda caafimaadka, sida biilka telefoonkeeda oo kale. Jean waxay boostada ku dirtaa lacag-bixinteeda dhowr maalmood ka hor ama waxay ku bixisaa barta internet-ka si ay u xaqiijiso in lacag-bixinadeeda ay bixiso waqtiga loo baahan yahay.



Lacag-bixinnada u ogolow waqtiga boostada adiga oo xilli hore diraya.

HAGAHA ISTICMAALAYAASHA KU HAGA WEERAHA MUHIMKA AH

Lacagta-Jeebka- Laga-Bixiyo

WAA MAXAY LACAGTA-JEEBKA-LAGA-BIXIYO?

Kharashaadka lacagta jeerka laga bixiyo waa waxa aad ku bixiso daryeelkaaga caafimaadka. Waxaa ku jiri kara qaddarka laga jari karo, caymiska-la-wadaago iyo lacag-bixinnada caymiska la wadaago. Qaddar kasta ee uusan caymin qorshahaaga caafimaadka waa kharashaadka jeebka-laga-bixiyo.

SIDA UU U SHAQEEYO

Shirley waxay haysataa laba cunug. Waxay bixinaysaa \$20 doolar oo ah lacag-bixinta caymiska ee la wadaago waqti kasta ee iyada ama carruurta kale ay yeeshaan booqashada dhakhtarka ee caadiga ah. Qoyskeeda wuxuu dhakhtarka la yeellan doonaa 15 booqasho sannadkan. Kharashaadka jeebka-laga-bixiyo ee Shirley wuxuu noqon doonaa \$300. *(Tirooyinka waa qiyaaso. Wac shirkadaada caymiska si aad u hesho faahfaahin dheeri ah.)*



$$\begin{array}{r} \$20 \text{ booqasho kasta} \\ \times \\ 15 \text{ booqasho} \\ \hline \$300 \text{ sannad kasta} \end{array}$$

HAGAHA ISTICMAALAYAASHA KU HAGA WEERAHA MUHIIMKA AH

Shabbakada

WAA MAXAY SHABBAKO?

Shabbakada waa liiska adeeg bixiyeyaasha qorshahaaga caafimaadka uu caymiyo. Adeeg-bixiyeyaasha shabbakada ku jira waxaa ansaxiyey qorshahaaga caafimaadka. Adeeg-bixiyeyaasha aan shabbakada ku jirin ma ansaxin qorshahaaga caafimaadka. Waxaad lacag badan ku bixin doontaa adeegyada aad ka hesho bixiyayaasha dibedda-shabakada.

SIDA UU U SHAQEEYO

Laura waxay doonaysaa in ay aragto la-taliyaha caafimaad dhimirka. Waxay heshay mid u dhow gurigeeda. Ka hor inta aysan sameysan jadwal booqasho, waxay hubineysaa in daryeel bixiyaha uu ku jiro gudaha-shabakada qorshaheeda caafimaadka. Kharashka Laura wuxuu noqon doonaa mid badan haddii ay doorato lataliye dibedda-shabakada ah.



Weyddii haddii daryeel bixiyahaaga uu shabakada ku jiro ka hor inta aadan booqashada qorsheyn.

HAGAHA ISTICMAALAYAASHA KU HAGA WEERAHA MUHIIMKA AH

Lacag-bixinta caymiska ee la wadaago

WAA MAXAY LACAG-BIXINTA CAYMISKA EE LA WADAAGO?

Lacag-bixinta caymiska ee la wadaago waad qaddarka aad ku bixinayso adeegga daryeelka caafimaad la caymiyay. Adeegyada sida booqashada dhakhtarka ee caadiga ah ama buuxinta rijeetada waxay yeellan doonnaan lacag-bixinta caymis oo la wadaago. Lacag-bixinta caymiskaaga ee la wadaago ayaa waxaa la filayaa marka aad adeegga hesho.

SIDA UU U SHAQEEYO

Thomas wuxuu qabaa dhiig kar. Wuxuu saddexdii biloodba mar booqdaa bixiyaha daryeelkiisa aasaasiga. Qorshahiisa caafimaadka ayaa u baahan lacag-bixinta caymiska la wadaago oo ah \$20 oo loogu talagalay booqashooyinka dhakhtarka. Thomas ayaa dhakhtar siiya lacag-bixinta caymiska ee la wadaago booqasho kasta.
(Qaddarka lacag-bixinta la wadaago wuxuu ku kala duwan yahay qorshaha caafimaadka.)



\$20

booqasho kasta

HAGAHA ISTICMAALAYAASHA KU HAGA WEERAHA MUHIMKA AH

Adeegyada Ka Hortagga

WAA MAXAY ADEEGYADA KA HORTAGGA?

Adeegyada ka hortagga waxaa bixiya qorshahaaga caafimaadka iyadoo uu waxyar kuugu fadhiyo ama uusan waxba kuugu fadhin. Waxaa ka mid ah baaritaanno bille ah iyo tallaalada ifilada/hargabka. Adeegyadan waxaa keliya la caymiyaa marka aad booqato adeeg-bixiye ku jira shabakada.

SIDA UU U SHAQEEYO

Taylor ayaa qaata baaritaan iyo tallaalka ifilada sannad kasta si uu u caafimaadqabo Taylor ayaa jecel in qorshahooda caafimaadka uu bixiyo lacagta adeegyada ka ilaalinaya in ay xanuunsadaan.



Adeegyada ka hortagga waxay kugu caawiyanaan in aad caafimaad qabto.

HAGAHA ISTICMAALAYAASHA KU HAGA WEERAHA MUHIIMKA AH

Dheefaha Caafimaadka Aasaasiga ah

WAA MAXAY DHEEFAHA CAAFIMAADKA AASAASIGA AH?

Dheefaha caafimaadka aasaasiga ah waa adeegyada daryeelka caafimaadka qorshayaasha oo dhan ay caymiyaan. Qaarkood waa bilaash. Qaar waxay leeyihiin lacag-bixinta caymiska la wadaago ama caymiska-la-wadaago.

Dheefaha caafimaadka aasaasiga ah waxaa ka mid ah:

- ▶ Booqashooyinka takhtarka iyo joogitaanka cusbitaalka
- ▶ Safarada lagu tago qolka xaaladaha degdegga ah
- ▶ Daryeel ka hor iyo kadib marka uu ilmahaaga dhasho
- ▶ Adeegyada caafimaadka dhimirka iyo daaweynta isticmaalka maandooriyaha
- ▶ Daawooyinka la isku qoro
- ▶ Adeegyada iyo aaladaha kugu caawinaya in aad bogsato haddii uu dhaawac ku soo gaaro ama aad leedahay xaalad ama naafonimo raagta
- ▶ Baaritaannada shaybaarka
- ▶ Adeegyada ka hortagga oo ay ku jiraan la-talinta, baaritaannada iyo tallaalka
- ▶ Maareynta cudurrada raaga sida cudurrada sonkorowga ama neefta
- ▶ Daryeelka takhtarka carruurta

SIDA UU U SHAQEEYO

Dhammaan qorshayaasha caafimaadka waa in ay ku jiraan dheefaha cusbitaal dhigista. Wac *Washington Healthplanfinder* ama shirkadda caymiskaaga si aad u hesho macluumaad dheeri ah. Lambarkeenna waa **1-855-923-4633**.

The **Washington Health Benefit Exchange** ayaa u hoggaansameysa sharciyada xuquuqaha madaniga ah ee federaalka ee ku habboon. Annagu dad kuma takoorno arrimo ku saleysan isirka, midabka, wadanka asalka, da'da, naafonimo ama jinsi.

HAGAHA ISTICMAALAYAASHA KU HAGA WEERAHA MUHIIMKA AH

Cascade Care

WAA MAXAY CASCADE CARE?

Qorshayaal caafimaad bixiya dheefo isku mid ah iyadoo aan la eegayn shirkadda aad dooratey. Waxay leeyihiin in laga jari karo oo ka yar inta badan qorshayasha, waxayna caymiyaan adeegyo badan ka hor inta aan la gaarin baahiyada laga jari karo.



WAA MAXAY CASCADE CARE SAVINGS?

Barnaamijka Cascade Care Savings wuxuu yareeyaa kharashka lacagaha joogtada ah ee qorshahaaga caafimaadka. Haddii aad xaq u leedahay, gobolka wuxuu bixin doonnaa qayb ka mid ah lacagahaaga caymiska ee joogada ah.

Waxaad xaq u yeellan kartaa Cascade Care Savings haddii waxyaabahan ay run yihiin:

- ▶ Haddii dakhligaaga uu ka hooseeyaa 250% ee Heerka Saboolnimada Federaalka.
- ▶ Xaq uma yeellan doontid Washington Apple Health (Medicaid) ama Medicare.
- ▶ Haddii aad ku qoran tahay qorshaha Cascade Care ee (Qalinka)Silver ama (Dahabiga ah)Gold.
- ▶ Haddii aad xaq u leedahay canshuur dhaaf, waxaad aqbashey qaddarka buuxa ee aad heli karto.

SIDA UU U SHAQEEYO

Jen waxay doonaysaa in ay hesho daryeelka ay u baahan yihiin ka hor inta aysan gaarin ka jaridda. Markaa ay doorato qorshaha Cascade Care ee ku jira *Washington Healthplanfinder*, Jen waxay heli doontaa dheefaha caafimaadka aasaasiga ah ee la caymiyay iyadoo aan jirin kharashka horumariska ah.



HAGAHA ISTICMAALAYAASHA KU HAGA WEERAHA MUHIIMKA AH


Isqoritaanka Furan

WAA MAXAY ISQORITAANKA FURAN?

Isqoritaanka Furan waa waqtiga sannadka ee aad isku qori kartid qorshe caafimaad oo xaddidan. Wuxuu bilowdaa 1-da Nofembar ee sannad kasta. Waxaad codsan kartaa Washington Apple Health waqti kasta.

SIDA UU U SHAQEEYO

Jackson wuxuu doonayaa in uu isku qoro qorshe caafimaad. Wuxuu akoon ka sameystay [wahealthplanfinder.org](https://www.wahealthplanfinder.org) ama **WAPlanfinder** app. Jackson ayaa adeegan kara oo isbarbardhigi kara qorsheyaasha caafimaadka laga bilaabo 1-da Nofembar si loogu helo midka saxda ah. Wuxuu isku qorey ka hor taariikhda kama dambeysta ah. Qorshahiisa caafimaadka ayaa bilaaban doonna 1-da Jannaayo ee sannadka soo socda.



Booqo [wahealthplanfinder.org](https://www.wahealthplanfinder.org) ama hel **WAPlanfinder** app si aad isugu qorto qorshaha caafimaadka.

HAGAHA ISTICMAALAYAASHA KU HAGA WEERAHA MUHIMKA AH

Muddada Isqoritaanka Gaarka ah


WAA MAXAY MUDDADA ISQORITAANKA GAARKA AH?

Dhacdooyinka nolosha qaarkood ayaa kuu oggolaanaya in aad isku qorto qorshe caafimaad waqti kasta oo sannadka ah. Tani waxaa loo yaqaannaa muddada isqoritaanka gaarka ah. Waxaad codsan kartaa muddada isqoritaanka gaarka ee ilaa 60 maalmood dhacdada ka-dib. (Eeg tusaalooyinka Dhacdada Nolosha ee U-qalanta.)

Shaqooyinka ee bixiya daryeelka caafimaad waa in ay bixiyaan muddada isqoritaanka gaarka ah. Muddadan waxay jireysaa 30 maalmood.

SIDA UU U SHAQEEYO

Xaaska Mia ayaa dhashey. Dhacdadan ayaa u oggolaatey in ay codsato muddada isqoritaanka furan. Waxay gashey gudaha akoonkeeda *Washington Healthplanfinder* 60 maalmood gudahooda ka-dibna waxay codsatey. Waxay hadda dooran kartaa qorshe cusub oo uu ku jiro cunugga.



Dhalashada iyo korsashada waa dhacdooyinka nolosha ee u-qalma ee kuu oggolaan kara in aad bedesho qorshahaaga caafimaadka.

HAGAHA ISTICMAALAYAASHA KU HAGA WEERAHA MUHIIMKA AH


Dhacdada Nolosha ee U-qalanta

WAA MAXAY DHACDADA NOLOSHA EE U-QALANTA?

Dhacdada nolosha ee u qalanta ayaa kuu oggolaaneysa in aad isku qorto qorshe caafimaad waqti kasta oo sannadka ah. Waxaa ka mid ah isbeddellada sida guurista, uurka iyo isbeddelada dakhliga. Waxaad haysataa 60 maalmood laga bilaabo muddada dhacdada si aad u codsato muddada isqoritaanka gaarka ah. *(Eeg Muddada Isqoritaanka Gaarka ah si aad u hesho macluumaad dheeraad ah)*

TUSAALOYINKA DHACDOOYINKA NOLOSHA EE U-QALMA

- ▶ Guur ama gelidda iskaashi guri
- ▶ Dhalasho
- ▶ Korsasho ama daryeel korsasho
- ▶ Helidda amar maxkamadeed (oo uu ku jiro taakuleynta carruurta)
- ▶ Luminta ku tiirsanaan ama xaalad ku tiirsanaan oo sabab u ah dhimasho, furiin ama kala-tagis sharci ah
- ▶ Isbeddel ku yimaada dakhliga
- ▶ Luminta caymis caafimaad kale
- ▶ U-guurista Washington ama dal cusub oo ku yaalla Washington
- ▶ Beddelka dhalashada ama xaaladda joogitaanka sharciga ah
- ▶ Xabsi ka sii deyn
- ▶ Xubinnimada qabiil



Waxaad haysataa 60 maalmood laga bilaabo muddada dhacdada si aad u codsato muddada isqoritaanka gaarka ah.



washington
healthplanfinder

click. compare. covered.

wahealthplanfinder.org
1-855-WAFINDER | 1-855-923-4633